

Lacagaha iyo kharashyada Shabakado isku xidhan




Macluumaadka macaamiisha

Somali | Soomaali

Victorian Default Offer (Dalabka go'an ee Victoria) waa qiimaha ugu badan ee lagu dalacan karo ama laga iibin karo dhammaan qoysaska iyo ganacsiyada badan ee shabakadaha isku xidhan (embedded networks) korontada.

Macluumaad muhiim ah

- **Shabakado isku xidhan** waa mid gaar loo leeyahay gaarna loo maamulo. Waxay koronto siiyaan guryo badan ama ganacsiyo sida dhismayaalka dabaqa ah, guryaha ay ku noolyihii waayeelada hawlgabka ah, baarkinada caravan ka, marina, ama xarumaha wax iihsiga. Xadhkaha korontada waxaa loogu talagalay in loogu suurtageliyo mulkiilaha goobta (tusaale, mulkiilaha guriga, shirkadda jirka, ama mulkiilaha beerta caravan) inuu koronto ka iibiyo dadka degan.



- Mulkiilaha goobta leh shabakad isku xidhan (embedded networks) ayaa korontada ka iibsanaya tafaariiqle koronto oo shati leh ka dibna 'kasii iibinaya' korontada macaamiisha kala duwan ee goobta. Xaaladahan oo kale, mulkiilaha ama qolo kale ayaa laga yaabaa in laga dhaafu shuruuda ah inay shati ka helaan **Essential Services Commission (Guddiga Adeegyada Muhiimka)** ah si ay u iibyaan una bixiyaan koronto.
- Haddii aad tahay macaamiil guri degan ama ganacsi yar ee lacag ku bixiya korantada ay bixiso shabakad isku xidhan, qiimaha lagugu soo dalacan karo waa mid xaddidan. Wixii ka dambeeyay Sebtembar 2020, Victorian Default Offer (Dalabka go'an ee Victoria) ayaa loo dhaqan geliyay inay ahaato qiimaha ugu badan ee shabakad isku xidhan ee wax sii iibinaysa ay ku dalaci karaan macaamiisha shabakad isku xidhan. Qiimahan waxaa dejiya sanad walba Essential Services Commission (Guddiga Adeegyada Muhiimka ah), maamulaha korontada Victoria ee madax banaan.
- **Victorian Default Offer (Dalabka go'an ee Victoria)** wuxuu u suurtageliyyaa macaamiisha Victoria inay heli karaan heshiis koronto oo cadaalad ah xitaa haddii aysan awoodin ama aysan rabin inay ka qaybgalaan suuqa tafaariiqda.




Lacagaha iyo kharashyada Shabakado isku xidhan

Meeqo ayay tahay in la iigu dalaco isticmaalka korontada?

Markaad ka iibsanayso koronto shabakad isku xidhan oo wax sii iibinaysa:

- Waa inaan **lagugu dallacin wax ka badan Victorian Default Offer (Dalabka go'an ee Victoria)**. Si kastaba ha ahaatee, shabakad isku xidhan (embedded network) ee wax sii iibinaysa waxay ku siin karaan macaamiisha qiimo ka hooseeya ama qiiimaha ugu badan.
- Waa in lagu siiyo **ogaysiis wixii isbeddel** ah ee ku yimaada shabakad isku xidhan ee wax sii iibinaysa 'lacagahooda iyo kharashaadkooda sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah (aan ka dambaynayn biilka xiga).



Sidee bay u shaqeeyso Victorian Default Offer (Dalabka go'an ee Victoria)?

- Guddiga Adeegyada Muhiimka ah ayaa dejiyaa Dalabka Go'an ee Victoria (Victorian Default Offer) sannad kasta ka dib markay qiimeeyaan kharashyada macquulka ah ee tafaariiqleyaashu u baahan yihiin si ay u daboolaan wixii uga baxa koronto siinta macaamiisha Victoria.
- Maadaama qiimaha koronto gaarsiinta ay ku kala duwan yihiin meelo badan oo ka mid ah Victoria, Dalabka go'an ee Victoria (Victorian Default Offer) ee adiga kugu habboon waxay ku xiran tahay soonaha koronto qaybinta. Haddii aadan hubin aagga qaybinta ee aad ku jirto, waxaad ka eegi kartaa biilka korontada ama waxaad ka eegi kartaa barta **internetka ee dawladda Victoria**.
- Markaad aqoonsato aagga qaybinta ee aad ku sugar tahay, **booqo guddiga' mareegtooda**, oo ogow Victorian Default Offer (Dalabka go'an ee Victoria) ee xaafadaada inta uu hadda yahay. Biilkaaga ka hubi qiimayaashan si aad u xaqiijiso inaan lagugu dalacin wax ka badan qiimaha Dalabka go'an ee Victoria (Victorian Default Offer).

Sidee baa biilka la iigu soo dirayaa?

Maareeyaha shabakad isku xidhan waa inuu ku siyyaa:

- Biil koronto oo hufan lana fahmi karo ugu yaraan hal mar saddexdii billoodba mar (inaad adigu ogoshahay wareeg xisaabeed kale mooyee), oo ay ku jiraan akhrinta mitirka iyo taariikhaha akhriska, iyo sharraxaadda sida kharashkaaga loo xisaabiyay.
- In lagu bixin karo lacagta ugu yaraan 13 maalmood oo maalmaha shaqada ah ka dib taariikhda biilka la soo saaray.
- Inay jiraan ugu yaraan laba qaab oo lacag-bixineed oo biilka lagu bixin karo (marka laga reebo goynta tooska ah).

Sidee buu biilka qiyaasta ku saleysan u shaqeyaa?

Shabakadaada isku xidhan ee wax sii iibinaysa waa inay aad isugu taxalujiiyan akhrinta mitirkaaga ayna sameeyaan marar badan intii macquul ah si ay u diyaariyaan biilkaaga korontada (ugu yaraan hal mar 12-kii biloodba mar). Shabakadaada isku xidhan ee wax sii iibinaysa waxa ay isticmaali kartaa mitir akhris qiyaas ku saleysan si ay ugu xisaabiso biilkaaga korontada xaalado gaar ah, oo ay ku jiraan marka aanay si macquul ah ama si kalsoonni leh ugu saleyn karin biilka akhriska mitirka dhabta ah. Haddii biilkaagu uu ku salaysan yahay akhriska mitirka, tani waa in si cad loogu xuso biilka.

Haddii aadan awoodin inaad xal wada gaartaan shabakada isku xidhan ee wax sii iibinaysa, Energy and Water Ombudsman (Victoria) (Muran-xaliyaha Korontada iyo Biyaha) ayaa kaa caawin kara inaad xalliso khilaafka.

Energy and Water Ombudsman (Victoria) (Muran-xaliyaha Korontada iyo Biyaha)

Taleefanka: 1800 500 509

Ilmaylka: ewovinfo@ewov.com.au

Fakis: 1800 500 549 (free fax)

Bogga internetka iyo foomka cabashada: www.ewov.com.au



Essential Services Commission

Guddiga Adeegyada Muhiimka ah (The Essential Services Commission) waa nidaamiye madax-bannaan oo kor u qaada danaha mustaqbalka fog ee macaamiisha Victoria marka la eego qiimaha, tayada iyo isku halaynta adeegyada muhiimka ah.

www.esc.vic.gov.au



Ogeysiis muhiim ah

Maclumaadka ku qoran daabacaadan waxaa keliya oo loogu talagalay inuu bixiyo hagitaan guud. Ma aha talo sharci ama mid kale oo xirfadeed mana aha in loo qaato sidii inuu yahay bayaan sharciga ee xukun kasta ah. Inkastoo ay guddigu sameeyeen dadaal kasta oo macquul ah si ay u bixiyaan maclumaadkii ugu dambeeyay ee saxda ahaa, waa inaad heshaa la-talin xirfadeed haddii aad wax walaac ah ka qabto, ka hor intaadan qaadan sax ahaanshaha, lacagaha, ama dhammaystirka maclumaadkan.

* Xaashidan xaqiiqada waxay ka tarjumaysaa maclumaadka khuseeya taariikhda markay ahayd 30-kii Juun 2023.

Sidee caawimaad ugu heli karaa biil khalad ah?

Haddii aad u malaynayso in waxa lagugu soo dalacday ay khalad yihiin, marka hore la hadal shabakadaada isku xidhan ee wax sii iibinaysa. Waxaa jiri kara sababo badan oo kordhin kara kharashka isticmaalka iyo biilkii la filayay mid ka sarreeya.

Tusaale ahaan:

- isbedel ku yimaada isticmaalka korontada
- lacago aan la bixin (aan la bixin) oo biilashii hore ah
- cilad dhinaca biilasha la qiyaasay ah.